**XEER L. 44 rep.**

**MAAMULAKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA MAAREEYUHU**

MARKII UU ARKAY xeer 4 novembar 1951, n. 1301, kaas oo xeerinaya ilaalinta heshiiska dhulka Soomaliya ee Talyaanigu maamulo sinayana fulin buuxda;

MARKUU ARKAY amar n.115 soona baxay 14 sebteembar 1951 kaas oo dugsiga kalkaaliyayaasha caafimaadka lagu asaasay iyo nidaamka la xiriira oo la ansixiyey.

MARKII UU QIIMEEYAY baahida loo qabo in wax laga beddelo iyo ku darid xeerarka kor ku xusan;

DHEGEYSTAYNA Guddiga cafimaadka ee Soomaalida;

**WUXUU XEEREYNAYAA:**

**Qod. 1**

Xeerka dugsiga kalkaaliyayaasha caafimaadka ee ku lifaaqan ayaa la ansixiyey.

Nadaamiyaha lagu tilmaamay wareegtada ee dhismaha guryaha waa la laalay.

**Qod. 2**

Amarkaan waxa uu hirgelayaa marka lagu daabaco fidinta rasmiga ah ee AFIS, waxa uuna ka billabanayaa 1da oktoobar 1951.

Muqdisho, 5 maarso 1952.

MAAREEYE
**Fornari**

HABEYNTA DUGSIYADA KALKAALIYAYAASHA CAFIMAADKA

**Qod. 1**

Dugasiga kalkaaliyayaasha caafimaadka waxa uu ku yaalaa Muqdisho, gudaha cisbitaalka Martiini.

Maamulaha cisbitaalka waxaa loo soo jeedinayaa maamulidda dugsiga.

**Qod. 2**

Dugsiga waa laba sano marle u qaybsan labo wareeg oo midwalba yahay 10 bilood. Wareeggu waxa uu billaabanayaa 1da diseembar waxana uu dhammaanayaa 30 setembar sannad walba.

**Qod. 3**

Dugsiga waxa lagu helaa dalab dadka heysta waxyaabaha soo socda:

1) Debolooma kalkaaliye caafimaad oo aan ka yareyn laba sano oo shaqa dhab ah;
2) Warbixin wanaagsan oo ay ka qoreen shaqaalaha daryeelka cafimaadka ee ay la shaqeeyeen;

iyo qofkii ku soo baxa imtixaanka guddi ka kooban kormeere caafimaad, maamulaha cisbitaalka Martiini iyo caafimaad yaqaan kale oo muddo ka muddo uu soo magacaabo madaxa xafiiska caafimaadka iyo wacyigelinta dadweynaha, kadib soo jeedinta kormeeraha caafimaadka.

**Qod. 4**

Koorsooyinku waxa ay ka kooban yihiin casharro iyo tababarro.

Casharrada sida caadiga ah waxa ay baxayaan galbihi, saacado isugeyn ahaan aan ka yaraan karin usbuucii 12 saac kana badan karin 15.

Hawlaha tababbarradana waxa ay ka dhacayaan qaybaha cisbitaalka iyada oo leh shax iyo hab uu dejiyo maamula dugsiga.

**Qod. 5**

Casharrdu wax ay xoogga saarayaan maadooyinka soo socda:

**Sannaka 1aad**

Barashada qaybaha jirha aadamiga;
“ “ unugyada jirku sida ay u shaqeeyaan;
“ “ cudurrada guud;
“ “ fayadhowrka;
“ “ cudurrada xubnaha taranka: waraabow iyo jabto;
“ “ shaybaarka.

**Sannadka 2aad**

Barashada qaybaha jirka
“ “ daawo sharci ah (warbixinno caafimaad – sababta dhimasho)
“ “ agabka caafimaad
“ “ sababaha keena cudurrada
“ “ cilmiga qalliinka
“ “ nadaafadda
“ “ daryeelka iyo cudurada waaweyn ee caruurta;
“ “ shaybaar.

**Qod. 6**

Casharrada waxa ay u baxayaan waqtiyada uu u xaddido xafiiska caafimaadka iyo waxbaridda dadweynaha waxa soo jeedinayo maamulha dugsiga.

**Qod. 7**

Ka gudbidda dowrada 1aad ilaa dowrada 2aad waxa ay noqoneysaa mid ku timaada natiijooyinka ka soo baxa imtixaannada uu qaaday guddi ka kooban maamulaha dugsiga _guddoomiye_ iyo macallimiinta dhiga maadooyinka dowrada 1aad.

**Qod. 8**

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay imtixaan qoraal ah oo ku saabsan mid ka mida maaddooyinka la barto, imtixaan afka ah ee maado kasta, iyo layli gacanta laga qabto.

**Qod. 9**

Dhamaadka dowrada 2aad ayaa la qabtaa imtixaanaadka shahaaddada dibloomada ee kaaliyaha caafimaadka. Waxaa qabta guddi imtixaan oo uu wareegto ku magacaabo maamuluhu marka uu arko soo jeedinta Xafiiska Caafimaadka iyo waxbaridda dadweynaha.

**Qod. 10**

Imtixaanka dibloomada waxa uu ka kooban yahay seddax tijaabo oo maadooyin guddiga imtixaanku doortay ah, wareysi afka ah maaddooyinka oo idil iyo layli gacan ka qabad ah.

**Qod. 11**

Imtixaanka waxaa lagu saxayaa toban dhibcood. Ardayga ka hela dhibco aan ka yareyn lix min toban dhibcood imtixaan kasta waxa uu heli doonaan u-qalmid. Kuwa aan helin u qalmid dhowr imtixaan oo aan ka badneyn seddex waxa ay ka qayb geli karaan fadhiga imtixaanka celiska.

**Qod. 12**

Fadhiga imtixaanka hore waxa uu dhacayaa shan iyo tobanka hore ee oktoobar dhexdooda, iyo fadhiga imtixaanka ku celiska ah waxa uu dhacayaa shan iyo tobanka hore ee novembar sannad walba.

Shaxda imtixaanka lagu qaado waxa dhigayo Maamulaha Dugsiga.

**Qod. 13**

Ardaydii ku dhacay saddex maaddo ka badan fadhiga hore ee imtixaanka iyo kuwa aan helin u qalmidda fadhiga imtixaaanka hore, waxa ay awoodaan in ay ku soo celiyaan dowrada.

Ma joogayaan Dugsiga kuwa ku dhacay imtixaanka laba sano oo isku xigta.

**Qod. 14**

Macallimiinta dugsiga waa in ay heystaan laawuriyada daawada oo xirfad shaqo leh. Howlaha waxbaridda, oo soconeya hal sano, waxaa soo gudbinaya Maamulaha asga oo arkay talada kormeeraha caafimaadka.

**Qod. 15**

Macallimiinta waxa la siiyaa mushaar bille ah oo dhan 100 sh. So. ah saacad walba oo usbuuca oo ay casharro bixiyaan. Xubnaha guddiga imtixaanka isku qiyaas ayaa lagu maamulaa iyo isla nadaamka kor lagu sheegay ee imtixaanka rukhsada lagu bixiyo dugsiyada hoose/dhexe.

**Qod. 16**

Maamulaha dugsiga waxaa la siin karaa xisooyin waxbarid saacado usbuucii aan ka badneyn labo.

**Qod. 17**

Kormeerka farsamada iyo edbinta ee dugsiga waxaa qabta kormeeraha caafimaadka kaas oo sidoo kale oggolaada barnaamijyada barista ee maaddooyinka kala duwan ee uu soo jeediyo Maamulaha dugsiga.

Muqdisho, 5 Maarj 1952.

MAAREEYE
**Fornari**